

Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Gobolka Ohio
BARNAAMIJKA CAAWIMAADDA CUNTADA EE GURMADKA
BARNAAMIJKA CUNTADA EE UU GOBOLKU FANGAREEYO

TILMAAMAHA U QALMIDDA EE QOYSKA

TIRADA XUBNAHA QOYSKA	DAKHLIGA		
	SANADKA	BISHA	TODDOBAADKA
1	\$24,119	\$2,009	\$463
2	\$32,479	\$2,706	\$624
3	\$40,839	\$3,403	\$785
4	\$49,199	\$4,099	\$946
5	\$57,559	\$4,796	\$1,106
6	\$65,919	\$5,493	\$1,267
7	\$74,279	\$6,189	\$1,428
8	\$82,639	\$6,886	\$1,589
9	\$90,999	\$7,583	\$1,749
10	\$99,359	\$8,279	\$1,910
XUBIN-KASTA OO DHEERAAD AH OO QOYSKA KU SOO BIIRA UGU-DAR	\$8,360	\$697	\$161

Macaamiishu waxay caddayn doonaan in uu dakhligooda duuduubka ahi dhan yahay ama ka-yaryahay cadadka dakhliga ee lagu muujiyay shaxda ee ay isku mid ka-yihiin dhinaca xubnaha qoyska. Macaamiishu waxaa kale oo ay xaqiijin doonaan, in ay illaa wakhti xaadirkan uu qoyskoodu ku nool yahay goob wakaaladda adeeg ka hesha. Waxaa warbixintan la-bixiyay iyada oo lala xidhiidhinayo guddoomidda caawimaadda Federaalka ee la-soo-marinayo dhinaca Barnaamijka Caawimadda Cuntada Gurmada ah iyo/ama barnaamijka uu gobolku fangareeyo.

Waaxda Beeraha ee Dawladda Mareykanka (USDA) waxay mamnuucdaa takoorka macaamiisha, shaqaalaha, iyo codsayaasha shaqada ee ku saleysan jinsiyadda, midabka, qowmiyadda, da'da, naafanimada, labnimada/dheddignimada, aqoonsiga nooca qofka, diinta, aargoosiga, iyo kolba sida ay u khuseyaan, aaminka siyaasadda, heerka guurka, heerka qoyska iyo waalidka, nooca galmada ama dhammaan ama qeyb dakhliga qofku uu ka yimaaddo barnaamijka caawimada dadweynaha, ama macluumaadka jenetikada ah ee xafidan ama barnaamij kasta ama hawl kasta oo lagu sameeyey ama ay maalgeliso Waaxdu. (Dhammaan waxyaalahaas la mamnuucay ma khuseyn doonaan dhammaan barnaamijyada iyo/ama hawlaha shaqaaleynta.)

Haddii aad rabtid inaad xareysato dacwad takoor ah oo ku saleysan barnaamijka Xuquuqda Dadweynaha, waxaad buuxisaa **Foomka Barnaamijka Dacwada Takoorka ee Waaxda USDA**, ee laga helo barta Internetka ee http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama xafiis USDA oo kasta, ama wac lambarka (866) 632-9992 si aad u codsato foomka. Waxa kale oo aad qori kartaa warqad ay ku jiraan dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Foomkaaga ama warqadda la buuxshay noo soo dir xagga boosta cinwaanka 'U.S. Department of Agriculture, Director, Office of Adjudication, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410', noogu soo dir fagaska (202) 690-7442 ama 'email'ka program.intake@usda.gov. Dadka dhagaha la', ama dhagaha adag ama leh naafanimada hadalka waxaad la soo xiriiri kartaa Waaxda USDA inta la maro 'Federal Relay Service' ee (800) 877-8339; ama (800) 845-6136 (Af Isbaanish).

Waaxda USDA waa fursad bixiye iyo shaqaaleeye loo siman yahay.

Waxaa tilmaamaha Barnaamijka Cuntada lagu soo-saaray, dakhliga tilmaamaha saboolnimada ee Federaalka ee soo-baxay sanadkan oo laba lagu-dhuftay, lagana jaray \$1.00 oo laga-dhigay tirada buuxda ee dollarka ee jajibka ugu dhaw. Waxaa tilmaamaha toddobaadlaha iyo billaha lagu soo saaray dakhliga sanadka oo loo-qaybiyay 52 iyo 12, oo ah sida ay iskugu-xigaan, waxaana laga dhigayaa dollarka buuxa ee tirada jajibka ee soo-baxaysa ee ugu-dhaw.